

GOOBO GANACSI OO AMNI AH

Talooyin wax ku ool ah oo ku saabsan sida loo maareeyo goobaha banaan si looga hortago fal danbiyeed.

Dambiilayaashu waxay raadiyaan fursad. Ku darista talooyinkan fudud sida si aad u maarayso una maamusho goobahaaga bannaan waxay yarayn kara fursadaha fal dambiyeedka.



ARAG HANA LUGU ARKO

Naqshadaynta goobaha bannaan si aad u kordhiso awoodaada aad ku arki karto waxa ka dhacaya hareeraha ganacsigaaga. Tani waxay kordhinaysaa fursadaha lagu arki karo dambiilaha (iyo qabashada).

① Tixgali dhererka unugyada iskifaalaha.

Iskifaalayaal dhaadheer waxay carqalad ku yihiin aragga, waxayna caawiyaan qarsoomidda dhaqamada dhibaataada wata ama aan wanaagsanayn.

② Daaqadaha dukaanka ka ilaali ama kadaa xayaysiisyada.

Tani waxay u oggolaan doontaa macaamiisha inay saadaaliyaan meesha ay soo galayaan waxayna u sahlayso dadka ag marayaa inay si dheeraad ah u eegaan iyagoo awood u helaya inay arkaan/eegaan gudaha.

IFTIIMIN

Ku rakib ama ku xidh nalal iftiimiya guud ahaan gurigaaga ama goobtaada. Kuwa leh ujeedooyinka xunxun waxay raadinayaan meelo ay uga qarsoomi karaan aragga/ in la arko.

③ Tixgeli nalalka dareenka dhaqdhaqaaqa leh ee loo yaqaan LED.

Waa kuwo dhaqaale ahaan iyo wax qabad ahaanba wax tar leh, lana awoodi karo.

④ Baddal nalalka gubtay, nadiifi nalalka, kana saar qashinka ku xeeran si iftiinku u noqodo mid waxtar leh.

⑤ Hubi in laydhku ama iftiinku joogto ahaado.

Iftiinka ama laydhka aan isku aadanayn wuxuu adkayn karaa awoodda ay wax ku arki karaan marqaatiyaashu.

MAAMULIDDA GOOBHA GALITAANKA

Ogaanshaha kan imanaya iyo kan baxaya waxay yarayn doonta hubanti la.aanta (qarsoomidda), waxayna caawin kartaa baajinta falal dambiyeedka.

⑥ Shaqaalaha dhig ama fadhiisi meel u dhaw marinada ah ama lagu soo dhaweeyo macaamiisha markay goobtaada soo galayaan.

Waxay taageeraysaa gelid maamulan iyadoona abuuraysa xariir macaamiil oo wanaagsan.

DAYACTIR/DARYEEL

Tusaale u noqo sida aad rabto in dadka kale ula dhaqmaan ganacsigaaga. Meel si fiican loo dayactiray ayaa muujinaysa qaabka, la socodka, iyo xakamaynta goobtaada ganacsi.

⑦ Nadiifi meelaha lagu socdo.

Tan waxaa ka mid ah baraf xaaqidda, nadiifinta walxaha burburay iyo qashinka iyo sidoo kale saaridda walxaha kale ee carqaladaha keena.

⑧ Ku dar walxaha qurxinta sida ubaxa ama geedaha.

⑨ Kaga masax/tirtir sawirada farshaxanka ama feegaarka 72 saacadood gudahood.

Fadlan ogow: Qoraalkani wuxuu soo jeedinayaa talooyin ku saabsan hababka hagaajin kara ammaanka ganacsigaaga, laakiin ma aha liis dhammaystiran. Macluumaad intaas ka badan, fadlan ku xidhnow ama kala xariir Kooxda Awood -siinta Xaafadda NET@edmonton.ca.



NEIGHBOURHOOD
Empowerment Team

Edmonton.ca/net | NET@edmonton.ca

Iskaashiga Magaalada Edmonton, Adeegga Booliska Edmonton, Xarunta Qoyska ee Waqooyiga Alberta, iyo Ururka Midaysan ee Gobolka Caasimadda Alberta.